

Talaalka Tetanus iyo Diphtheria (Td)

Talaalku (ama iraabka) waxa weeye sida ugu wanaagsan ee loogaga hor tegi karo cudurada khatarta ah. Ururka National Advisory Committee on Immunization waxa ay si adag isugu raaceen talaal joogto ah. Talaalka Td-gu wuxuu isugu jiraa laba. Wuxuu dadka kala dagaalamaa tetanada iyo gawracatada. Waxa la siiyaa dadka ay da'doodu ka wayn tahay toddoba sanno.

Waa maxay gowra-catadu (Diphtheria)?

Gawracatadu waa cudur halis ah oo ku dhaca sanko, cunaha iyo maqaarka. Waxay keentaa cuno xanuun, xumad iyo jidhi-dhico. Way ku xumaan kartaa qofka waxaanay keeni kartaa neef qabatin, wadne joogsi iyo dareemada jidhka oo dhaawacma. Gawracatada waxaa ku dhinta hal qof tobankii qofba. Badi waxa laga kala qaadaa qufaca iyo hindhisada.

Waa maxay teetanadu?

Teetano ama daaman isku dhegu waxa weeye cudur halis ah kaas oo iman kara marka wasakh ay la socoto baakteeriyada tetanadu gasho meel maqaarka dilaacsan. Baakteeriyada teetanada waxa lagu arkaa meel kasta gaar ahaan ciida, siigada iyo saalada xoolaha. Dadku iskama qaadaan. Teetanadu waxay xanuujisaa muruqyada qoorta, gamcaha, lugaha iyo caloosha iyo garaac xanuun badan oo lafaha jebin kara. Xitaa haddii hore loo ogaado, teetanadu waxay dishaa laba 10kii qofii qaada.

Ilaa xad intee le-eg ayuu talaalka Td ka hor tegi karaa teetanada iyo gawracatada?

Marka la qaato talaalada Td Polio ee la isugu tala galay, waxay 100 kiiba boqol dadka ka hor tagtaa teetanada, in ka badan boqolkiiba 95 dadka waxay ka difaacdaa gawracatada. Dadka talaalka qaata haddii cuduradani ku dhacaan talaalku wuu u fudu-deeyaa.

Goorma ayaa la isa siiyaa talaalka Td-ga?

Dadka badi waxa laga talaalaa teetanada iyo gawracatada marka ay yar-yar yihiin. Marka 15 jir la noqdana waxa dadkii markay yar-yaraayeen laga talaalay teetanada iyo gawracatada. Talaalkan "suubiska ahi" laga yaabaa in uu la socdo talaalka qalalkuna (polio). Dadka waa weyni waa in ay is talaalaan 10-kii sanadoodba mar si ay u helaan ka hortag joogto ah.

Ma yahay talaalka Td-du mid aan wax yeelo lahayn?

Haa. Dhibaatooyinka lagala kulmi karo talaalka Td-gu way sahlan yihiin waxayna ku dhamaadaan mudo yar oo maalmo ah kadib marka talaalka la qaato. Damqasho yar, barar iyo meesha irbada lagu muday oo casaata. Dad tiro yar ayaa yeesha xumad/qandho fudud, cuntada niyad u waaya ama daal isku arka maalin ama laba maalmood kadib marka ay talaalka qaataan.

Waa inaad had iyo goor dhakhtarkaaga ka waraysato dhibaatooyinka iyo faa'idooyinka talaalkasta.

Goorma ayaan dhakhtarkayga la hadlaa?

La hadal dhakhtarkaaga haddii saddex maalmood gudahood talaalka kadib astaamahani soo baxaan:

- Caaro
- afka ama wejiga uu bararo

- neef qabash
- midabka oo doorsooma qofkuna u ekaado siddii wax daan-daansan
- yeesho xumad badan (ka badan 40 C ama 104 F)
- suuxo
- ama dhibaatooyin kale oo khatar ah aad ku aragto.

Yaa laga daayaa talaalka Td-da?

Dhakhtarka ayaa go'aamin kara inaan qofka la siin talaalka Td-da haddii uu qofku:

- leeyahy xumad badan ama cudur ka xun hargab
- uu xasaasiyad xun ka qaado talaalkan(anaphylaxis)
- uu xasaasiyad xun ka qaado qayb ka mid ah talaal-kan

Yaan la xidhiidhaa haddii aan su'aalo kale ka qabo talaalka Td-da?

Wixii faah-faahin dheeraad ah la xidhiidh dhakhtarkaaga ama xarunta caafimaad ee kuugu dhow.

Diiwaan gelinta talaalada

Kadib marka ilmahaaga la talaalo, hubi in dhakhtarku "kaadhka jaalaha ah" ku diiwaan geliyo talaalka. Xaruntaada caafimaadka ayaa waalidka ka rabta in ay keenaan cadayn tusaysa in ilmahooda iskuulka tegayaa uu wada qaatay talaaladii looga baahnaa. Faa'iido ayey u leedahay qofka wayn in uu ogaado markii ugu dambaysay ee la talaalay si haddii uu kugu dhaco dhaawac talaalka tetanus u baahan loo ogaado in hore lagaaga talaalay iyo in kale. Diiwaankaagan meel adag dhig!